



## La sheekeeysiga Ilmaha

Qoraal loogu talagalay qoysaska carruurta leh ee ku jira xerada qaxootiga

Waa sidee nolosha caadiga ah ee qoyskaaga iyo tan ilmahaaga? Ma doonaysaa inaad ka hadasho arrimaha ku saabsan ilmahaaga? Xeradeenna qaxootiga waxaa ka jira barnaamij wadahadal oo loogu magac daray la sheekeeysiga ilmaha, kaasoo Aad la yeelan karto shaqaalahenna. Ujeedada wadahadalku waa sidii loo taageeri lahaa nolosha caadiga ah ee qoyska iyo nolol-wanaagga ilmaha. Mudada wadahadalku socon doono waa qiyaastii saacad iyo bar (1½). Intaa dabadeed waxaan si wadajir ah uga fekeraynaa qofka dhallinyarada ah ma u baahan yahay taageero, arrinkaasna yaa ka caawin kara.

### Waxyabaha aan kaga hadlayno barnaamijkaan la sheekeeysiga ilmaha waa:

- Qaab sidee ah ayay u socdaan arimaha nolosha caadiga ah ee ilmaha, iskuulka/xannaanada, guriga iyo xilliyada firaaqadaba.
- Waa maxay arrimaha qofka dhallinyarada ah ilaalinaaya ama badbaadada u ah
- Meelaha uu qofka dhallinyarada ah ku xooggan yahay iyo meelaha uu u jilicsan yahay ee arrimihisa nololeed ee caadiga ah

Xoogganaanta waxaa loola jeedaa, arrimaha sida wanaagsan ee caadiga ah ugu socda.

U jilicsanaantana waxaa loola jeedaa, arrimaha ay dhibaatadu ka haysato, amaba arinka laga yaabo in ay dhibaato ka timaaddo, haddii wax laga qaban waayo.

Xoogganaanta iyo u jilicsanaantuba waa kuwo ka dhasha islaafalgalka qofka dhallinyarada ah iyo degaanka ku hareereysan, waxaana suurtgal ah in arrimahaas wax laga qabto oo saamayn lagu yeesho.

### Falalka ama waxyabaha badbaadada ah waxaa ay ka caawinayaan in uu arrimihisa si wanaagsan uga soo baxo

Waxaayabaha badbaadada ah waa:

- Nolosha caadiga ah ee leh nidaamka joogtaysan, cunto caafimaad leh iyo nasahso ku filan:
- Xiriir wanaagsan oo uu la leeyahay qoyskiisa iyo ehelkiisaba
- Xiriir sokeeye oo isaaminaad ku dhisan oo uu la leeyahay qof weyn oo ka mid ah dadka hawlahiisa gacanta ku haya (tusaale ahaan iskuulka, goobta hiwaayadda, waaxda carruurta)
- Faham ku habboon da'diisa oo ku saabsan xaaladdiisa nololeed
- Dareenka ah in uu yahay qof ka tirsan fasalkiisa iyo bulshada uu la nool yahayba
- Waxbarashada ama iskuul dhigashada qofka dhallinyarada ah
- Qofka dhallinyarada ah wuxuu muujin karaa dareenkiisa, waxaana taageero la siinayaan maalmaha adag ee noloshiisa soo mara
- Hiwaayado wanaagsan
- Saaxiibbo la da'ah

Wadahadalkan loogu magac daray la sheekeeysiga ilmaha waa mid aan khasab ahayn oo qofku uu si iskiis ah u imaan karo, mana aha mid saamayn ku leh arrimaha magangalyodoonka qaxootinnimo ama go'aamada arrinkaas la xiriira.